

Bal malee magaalo midabka maqaarkaagu aan lagu cabbiri karin caafimaadkaaga, waxbarashadaada, ama shaqadaada.

Mashruuca Cadaaladda Bulshada iyo Jinsiyadda



Mashruuca Cadaaladda Jinsiyadda iyo Bulshada “Race and Social Justice Project” (RSJI) waa barnaamij ay soo saartay dawladda Maamulka Magaalada Seattle. Ujeedadda barnaamijka ayaa ah dabargoynta takoorka ku salaysan jinsiyadda gudaha Seattle, iyo dhiirigelinta ka qaybgalka buuxa ee dhammaan dadka deggan magaaladeena.

RSJI waxay leedahay saddex himilo:

- Joojinta farqiga ku salaysan jinsiyadda ee dawladda Magaalada.
 - Hagaajinta adeegyada Magaalada iyo ka hawlgalka bulshada.
 - Joojinta farqiga ku salaysan jinsiyadda ee dhammaan jaaliyadaha ku nool Seattle.

Hagaajinta adeegyada muhaajiriinta iyo qaxootiga

Hagaajinta helitaanka adeegyada muhaajiriinta iyo qaxootigu waa qayb muhiim ka ah Mashruuca Cadaaladda Jinsiyadda iyo Bulshada. Iyada oo qayb ka ah RSJI, Magaalada Seattle waxay bixisaa adeegyada turjubaanka iyadoo ay dadku codsan karaan marka ay kala xidhiidhayaan barnaamijyada iyo Adeegyada ee Maamulka Magaalada Seattle.

Midabtakoorka: waa dhibaato Maraykan

Midabtakoorku waa dhibaato ka jirta adduunka oo dhan. Waddamada qaarkooda waxay u kala saaraan dadka diin; qaarna waxay isticmaalaan afka; kuwo kalena waxay isticmaalaan qabyaalad ama qoomiyad.

Midabtakoorka nidaamsan waa

nidaam cunsuriyad iyo awood ku salaysan midabka maqaarka ama qoomiyadda. Maanta, xeerar ayaa ka ilaaliya dadka takoorka mamnuuca ah, misana dadka aan caddayn waxay weli arkaan waxyeelada uu geysto takoorka nidaamsan. Waxay jinsiyadda saamaysaa meesha aanu degganahay, meesha aanu ka shaqayno, sida aanu u shaqayno dugsiga, inta aanu noolaan doono, iyo haddii aan ka hawl galayno nidaamka dambiga ee dambiyada.

RSJI: ka wada-shaqaynta cidhibtirka midabtakoorka

RSJI waxay hagaajinayaan sida ay Magaalada Seattle ugu adeegto dadka deggan, oo ay ku jiraan muhaajiriinta iyo qaxootigu.

Fadlan ku soo biir Magaalada Seattle si aan uga wada-shaqeyno cidhibtirka midabtakoorka. RSJI waa mashruuc muddo-dheer soconaya kaasoo magaaladeena naloogu hagaajinayo.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee la xidhiidha Mashruuca Cidhibtirka Midabtakoorka ee Seattle (Project to End Racism in Seattle) (RSJI), kala xidhiidh Xafiiska Seattle ee Xuquuqal Insaanka (Seattle Office for Civil Rights) 206-684-4500, ama waxaad booqataa www.seattle.gov/rsji.



Imagine a city where your skin color does not predict your health, your education, or your job.

Seattle Race and Social Justice Initiative (RSJI)



The Race and Social Justice Project [RSJI] is a program of Seattle City government. Its mission is to end systemic racism in Seattle, and to encourage full participation by all residents of our city.

RSJI has three goals:

- End race-based disparities within City government.
- Improve City services and community engagement.
- End race-based disparities in all communities of Seattle.

Improving services for immigrants and refugees

Improving access to services for immigrants and refugees is an important part of the Race and Social Justice Project. As part of RSJI, the City of Seattle provides free language translation and interpretation services on request for people when contacting the City for programs and services.

Racism: an American problem

Discrimination is a problem around the world. Some countries use religion to divide people; others use language; and some use tribal membership or nationality.

Institutional racism is a system of prejudice and power based on skin color and nationality. Today, laws protect people from illegal discrimination, yet people who are not white still experience the result of systemic racism. Race influences where we live, where we work, how well we do in school, how long we will live, and whether we will be involved in the criminal justice system.

RSJI: working together to end racism

RSJI is improving the way that the City of Seattle serves our residents, including immigrant and refugee households.



Please join the City of Seattle to work together to end racism. RSJI is a long-term project to improve our city for all of us.

For more information about the Project to End Racism in Seattle [RSJI], contact the Seattle Office for Civil Rights at 206-684-4500, or visit www.seattle.gov/rsji.